

# Maalgalinta Waxqabadka Soo kabashada Barnaamijka (RAFT) ee Berito

## Dumentiyada La aqbalaayo



LIVE WELL  
SAN DIEGO

RAFT waa barnaamij lacag caddaan ah oo hal mar la bixinayo kaas oo ay diyaarisay Adeegga Qoyska ee Yuhuuda (JFS), waxayna ku maalgelisay iyada oo lala kaashanayo Ismaamulka San Diego. Waxay siisaa qoysaska iyo/ama dadka waaweyn (55+) si shuruud la'aan ah, lacag aan xadidnayn oo dhan \$4,000 si ay u daryeelaan baahiyahooda degdega ah.

Haddii aad leedahay akoon bangi, koontada Venmo/PayPal, ama baraha shaqooyinka onleenka ah ee aad ka hesho dakhligaaga, waxaanu ku xaqiijin doonaa macluumaadkaaga nidaam onleen ah. Marka ay sidaas tahay, waxay u badan tahay inaadan u baahnayn inaad keento dukumeenti dheeraad ah. Haddii dakhligaaga aad ku hesho lacag caddaan ah ama jeeg oo keliya, oo aanad lahayn mid ka mid ah akoonnadan, waxaan u baahan doonaa inaan gacanta ku xaqiijinno macluumaadkaaga. Xaaladdan oo kale, fadlan eeg dukumeentiyada hoose ee la aqbalayo kuwas oo aad u baahan tahay inaad keento si aad u xaqiijiso u-qalmitaankaaga barnaamijka. Haddii aadan awoodin inaad na siiso macluumaadka hoose si aan u xaqiijino u-qalmitaanka, fadlan arrintaan ku muuji codsiga onleenka ah xubin kooxda JFS ah ayaana kaa caawin doonta tillaabooyinka xiga. Mahadsanid.

### Caddaynta Aqoonsiga:

Foomamka la door bidayo ee aqoonsiga sawirka ee dawladu bixisay ee aanu aqbalayno ayaa halkan ku taxan:

- Shatiga Darawalka
- Aqoonsiga Gobolka
- Baasaborka Maraykanka
- Baasaboor aan ahey kan Maraykanka
- Aqoonsiga Ciidamada Militariga
- Kaarka Degenaanshaha
- Caddaynta sharci ugu dacwoodka (foomka N-550 ama N-570)
- Caddaynta dhalashada (foomka N-560 ama N-561)
- Kaarka deganaanshaha rasmiga ah (1-551)
- Aqoonsiga sawirka qabiilka ee Maraykanka u dhashay
- Kaarka Aqoonsiga Qunsuliyada
- (Ajnabi) Kaadhka Aqoonsiga Codbixiyaha
- Oggolaanshaha Shaqada ee Maraykanka
- Ogolaanshaha Ardayga
- Shatiga Darawalnimada Booqda Muddada kooban joogaya
- Sawirka aqoonsiyada kale ee ay dowladdu bixiso

### Ama, laba ka mid ah dokumentiyadan:

- Shahaadada Dhalashada
- Kaarka caymiska caafimaadka/kaarka daawada (oo ay ku qorantahay taariikhda dhalashadu)
- Kaarka caymiska (oo leh taariikhda dhalashada)
- Kaarka aqoonsiga shaqada (oo leh taariikhda dhalashada)
- Kaarka Aqoonsiga codbixiyaha
- Diiwaangelinta baabuurta oo leh magaca iyo cinwaanka
- Diiwaanada diiwaangelinta rasmiga ah ee dugsiga
- Diiwaanada korsashada
- Diiwaanka siyaasadda caymiska nolosha
- Shahaadada baabtiiska ama shahaado diimeed kale (oo wata taariikhda dhalashada)
- Diiwaanada cisbitaalka ee rasmiga ah (oo leh taariikhda dhalashada)
- Foomka I-94
- Foomka DHS I-220A

## Dakhliga Qoyska:

Dakhliga qoyskaagu waa inuu ahaadaa ama ka hooseeya 200% Heerka Saboolnimada Federaalka (FPL) si aad ugu qalanto barnaamijkan.

**Dukumeentiyada la door bidayo si loo xaqijiyo in dakhliga qoyskaagu uu ku jiro ama ka hooseeyo heerka u-qalmitaanka barnaamijkan waxaa ka mid ah:**

- Cashuur celinta ama rasiidka cinwaanka guriga laga bilaabo 2021 ama 2022 sanad cashuureedka (Foomka 1040, Jadwalka C, ama foom kale oo cashuureed oo la xareeyay)
- Dukumeentiyada Lambarka Bulshada: Bayaanka bangi ee faa'iidada sannadlaha ah ama dhaqdhaqaqa bangiga ee muujinaya deebaaji tooska ah ee Dakhliga Kaalmada Nabadsugidda ("SSI"), Caymiska Naafada ee Lambarka Bulshada ("SSDI")
- Warqadda xaqijinta diiwaangelinta ama u-qalmitaanka mid ka mid ah barnaamijyada soo socda:
  - a) Barnaamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah ("SNAP") ama CalFresh – tasoo ku jirta gudaha 12 kii bilood ee lasoo dhafay wakhtiga codsiga.
  - b) Kaalmada Ku Meel Gaarka ah ee Qoysaska Baahan ("TANF") ama CalWORKs – tasoo ku jirta gudaha 12 kii bilood ee lasoo dhafay wakhtiga codsiga.
  - c) Haweenka, Dhallaanka, iyo Carruruurta ("WIC") – tasoo jirtay 12 kii bilood ee la soo dhaafay wakhtiga codisga.

AMA

- d) nuqluka Kaarka Wareejinta Faa'iidooyinka Elektrooniga ah (EBT), Kaarka Medi-Cal, ama Kaarka WIC
- Waxaan sidoo kale aqbalnaa dukumeentiyada mushaharka laga bilaabo 2021 ama 2022 ee dhammaan dadka qaangaarka ah ee qoyska ee dakhligu soo galo:
- W2 ama foomyada 1099
- Warqada abaal marinta shaqala'aanta oo ku taariikhaysan 12 bilood gudahood wakhtiga codsiga.

## Caddaynta Daganashada:

Xaaladaha qaarkood, waxa laga yaabaa inaan ku waydiino dukumeenti si aan u xaqijjino meesha aad ku nooshahay.

**Foomamka dokumentiga degenaanshaha ee la doorbidayo ee aanu aqbalayno ayaa halkan ku taxan:**

- Sawirka aqoonsiga ee ay dawladdu soo saarto oo hadda ah (shaqaynaya/aan dhicin) oo leh ciwaanka guriga.
- Biilasha tasiilaadka, biilka taleefanka guriga, biilka internetka, ama biilka fiilada ee magaca codsadaha ee 90 maalmood ee u dambeeyay oo wata ciwaanka adeegga
- Dukumentiyada amaahda ama kiraynta guriga oo leh ciwaanka guriga, oo muujinaya degenaanshaha hadda.
- Sabarlooogada guriga oo leh ciwaanka iyo magaca shaqsiga oo dhammaystiran
- Diiwaanka dugsiga oo rasmi ah oo ah sannadka hadda socda kaasoo xaqijjinaya diiwaangelinta carruurta iyo cinwaanka guriga.
- Caymiska kirada oo aan dhicin oo leh ciwaanka guriga caymiska kujira
- Diiwaangelinta baabuurta oo aan dhicin ee cinwaanka guriga

## Dukumeentiyada kale ee la aqbalayo waa:

- Cashuur celinta ama rasiidka cinwaanka guriga laga bilaabo 2021 ama 2022 sanad cashuureedka (Foomka 1040, Jadwalka C, ama foom kale oo cashuureed oo la xareeyay)
- Dukumeenti/warqad xaqijin ah oo dawladeed oo ku taariikhaysan 12 bilood gudahood (tusaale warqadda xaqijinta dheefaha ee Barnamijka Kaalmada Nafaqada ee Dheeraadka ah ("SNAP") AMA nuqlu ka mid ah Faa'iidooyinka EBT, Kadalka MassHealth, ama Kaarka WIC)
- Biilka canshuurta hantida oo leh ciwaanka guriga, oo muujinaya degenaanshaha hadda.
- Warqad ka timid ganacsi/shirkad ganacsi oo saddexaad oo rasmi ah oo leh ciwaanka guriga, oo uu keenay Xafiiska Boostada Mareykanka 90-kii maalmood ee la soo dhaafay

## Haddii aad halis ugu jirto guri la'aan, fadlan soo gali dukumeentiyada soo socda:

- Ogeysiiska bixinta kirada oo soo daahday laba bilood ama ka badan sanadkii la soo dhaafay
- Ogeysiis guri ka saarid oo la xareeyay
- Ogeysiis qoran oo ku saabsan in guriga lagaa saarayo ama handadaad uu mulkiilaha gurigu kuu gaystay mulkiilaha ama maareeyaha gurigu oo ah inuu wakhti kasta kaa saari karo guriga saddexdii bilood ee la soo dhaafay iyadoo ay ugu wakan tahay in aadan kiradii bixin
- Caddaynta ku noolaanshaha hoteel ama hudheel

Haddii aadan awoodin inaad keento dukumeentiyada sare, waxaan sidoo kale aqbali doonaa warqad taageero ah oo ka socota urur beebleed ama wakaalad la aqoonsan yahay oo tilmaamaysa inaad guri la'aan tahay. Warqadan waa inay ku jirtaa maclummaadka xiriirka tooska ah ee xubin ka tirsan shaqaalaha ururkaas oo lagu buuxiyaa warqadda ururka. Kooxda JFS ayaa la xiriiri doonta xiriirkaaga liiska ku qoran si ay u xaqiijiyaan.

## Haddii aad daryeesho qof qaangaar ah oo kugu tiirsan ama naafo ah, fadlan soo gali dukumeentiyada soo socda:

- Canshuur celinta tilmaamaysa in aad xaraysay Daynta Daryeelka Ilamaha Ku tiiranaha (Child and Dependent Care Credit)
- Boonada Fasaxa Qoyska ee Lacagta lagu qaato ee Daryeel-bixiyeyaasha